**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xeerka Xawaaladaha Somaliland
# Xeer Lr. 86/2019

## Tusmada Xeerka

**Wareegto Madaxweyne**

Aaraar

**CUTUBKA 1AAD MABAA'DDIIDA GUUD**
Qodobka 1aad Erey-bixinta
Qodobka 2aad Magaca Xeerka
Qodobka 3aad Ujeeddada Xeerka
Qodobka 4aad Adeegyada Maaliyadeed ee Xawaaladdaha

**CUTUBKA 2AAD**
Qodobka 5aad Asaasidda Xawaaladdaha
Qodobka 6aad Shuruudaha Ruqsadda
Qodobka 7aad Ruqsad-Siinta Laamaha Xawaaladaha Shisheeye
Qodobka 8aad Dammaanadda Ruqsadda
Qodobka 9aad Cusbooneysiinta Ruqsadda
Qodobka 10aad Hakinta Iyo La Noqoshada Ruqsadda
Qodobka 11aad Soo Celinta Ruqsadda
Qodobka 12aad Muddada Ruqsadda
Qodobka 13aad Isku–Biiridda Xawaaladaha
Qodobka 14aad Dhammaadka xawaaladda

**CUTUBKA 3AAD MAARAYNTA XAWAALADAHA**
Qodobka 15aad Maamulka Xawaaladaha
Qodobka 16aad Hanti Dhawr-ka Xawaaladdaha
Qodobka17aad Kaydinta Xogta Dhaqdhaqaaqyada
Qodobka 18aad Laamaha Iyo Wakiilada
Qodobka 19aad Daryeelka Macaamiisha

**CUTUBKA 4AAD AWOODAHA BAANKA**
Qodobka 20aad Awoodaha Baanka
Qodobka 21aad Kormeerka Iyo Baadhidda Xawaaladaha

**CUTUBKA 5AAD CIQAABAHA**
Qodobka 22aad Ganaaxyada
Qodobka 23aad Ciqaabaha Shakhsiyaadka Iyo Shirkadaha

**CUTUBKA 6AAD QODOBO QUBANE AH**
Qodobka 24aad Hirgelinta Xeerkan
Qodobka 25aad Soo Saarista Wareegtooyin
Qodobka 26aad Fulinta Xeerkan

Qodobka 27aad Xallinta Khilaafaadka Iyo Rafcaan ka Qaadashada Go'aan diidmo Ruqsadeed
Qodobka 28aad Dhaqangalka Xeerka

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-303/052019 Taar: 02/05/2019

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Xawaaladaha Somaliland**
**Xeer Lr. 86/2019**

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Helay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-39/829/2019, kuna taariikhaysan 13/04/2019, ujeeddadiisuna tahay soo gudbinta go'aanka ansixinta Xeerka Xawaaladaha Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad iyo 76aad, ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Waxaan soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Xawaaladaha Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr.86/2019.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay:** - Qodobada 53aad, 74aad (1), 76aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyda Somaliland.

**Maarkuu Arkay**: - Qodobka 11aad, 13aad iyo 31aad ee Dastuurka Jamhuuriyda Somaliland ka hadlaya Dhaqaalaha, Baananka, Xoriyadaha la-haanshaha hanti-gaar ahaaneed.

**Maarkuu Arkay:** - Baahida loo qabo hubinta iyo xaqiijinta habsami u maaraynta ka ganacsiga xawaaladaha.

**Markuu Ogaaday:** - Muhiimada ay leedahay in xeer loo sameeyo Ganacsiga Adeegayada Maaliyadeed ee Xawaaladdaha.

**Markuu tixgaliyay:**- In loo baahan yahay in la helo Xeer lagu maareeyo lacagaha Xawaaladaha iyo Shuruudaha looga baahan yahay.

## WUXUU
## ANSIXIYAY XEERKAN

## CUTUBKA 1AAD
## MABAA'DDIIDA GUUD

### Qodobka 1aad
### Erey-bixinta

Haddii aan si kale loo macnayn Xeerkan gudihiisa, erayada soo socdaa waxa ay yeelanayaan macnaha ku hor qoran: -

**Baan ganacsi:** - Waxa loola jeedaa hay'ad kasta oo maaliyadeed ha noqoto waddani ama shisheeye taas oo qabata dhigaalo, bixisana amaaho ganacsi iyo adeegyo maalgashi;

**Baanka:** Waxa loola jeedaa Baanka Somaliland ee lagu asaasay Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland Xeer Lr. 54/2012;

**Dal:** - Waxa loola jeedaa dalka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Dammaanad:** - Waxa loola jeedaa qaddar lacageed oo cayiman, dahab ama hanti ma- guurto ah oo u dhiganta qaddarka lacagta ah ee xeerku sheegay oo Baanku ka haynayo xawaalad muddada ay ruqsaddu shaqaynayso;

**Goob ganacsi oo**

**Rasmi ah**: - Waxa loola jeedaa dhisme kasta oo xawaaladdu leedahay ama heshiiska uu ku kiraysatay ay ka hadhsan tahay ugu yaraan hal (1) sanno taariikhda ay soo codsato ruqsadda;

**Hakin:** - Waxa loola jeedaa in si ku meel gaadh ah loo joojiyo muddo cayiman ku shaqaysiga ruqsad uu Baanku bixiyey;

**Laan:** - Waxa loola jeedaa xafiis ay xawaaladdi ka furatay degmo ama gobol ka mid ah dalka;

**Laan xawaalad Shisheeye**: - Waxa loola jeeda xafiis ay xawaalad shisheeye ka furatay dalka;

**Kacday (Musalaf):** - Waxa loola jeedaa xawaalada raasameelkeeda iyo deynteedu is' le-eg kaadeen ama dayntu ka badatay deynta lagu leeyahay oo ay bixin kari weydo marka ay waajibto.

**Raasamaalka Gundhiga ah**: - Waxa loola jeedaa lacagta qof kaliya, shuraako ama saamiley ku asaaseen ganacsi xawaaladeed;

**Ruqsad:** - Waxa loola jeedaa shati ganacsi xawaaladeed oo loo bixiyey si waafaqsan Xeerkan;

**Shakhsi qanuuni Ah:** - Waxa loola jeeda hay'ad kasta oo leh jiritaan ka madax-bannaan saamileydeeda ama aasaasayaasheeda isla markaana iskeed u geli karta heshiis, oogi karta loohuna oogi karo dacwad;

**Wakiil:** - Waxa loola jeedaa cid kasta oo xawaalad shisheeye ama waddani ah u xil saaratay in ay uga fuliso hawlaheeda xawaaladeed gobol ama degmo dalka ka mid ah;

**Xarun:** - Waxa loola jeedaa xafiiska guud ee laga maamulo xawaaladda;

**Xawaalad:** - Waxa loola jeeda ganacsi kasata oo si Xeerkan waafaqsan u bixiya adeegyada lacag dirista iyo lacag bixinta dalka gudihiisa ama dibaddiisa;

**Xawaalad Shisheeye:** Waxa loola jeedaa ganacsi xawaaladeed oo ay leeyihiin dad aan ahayn muwaadiin reer Somaliland ah.

**Lacag:** - Waxa loola jeedaa lacag naqad ah ama ta loo adeegsado aallada casriga ah oo Electronik ah

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Xawaaladdaha Xeer Lr. 86/2019

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeedada Xeerkani waa hubinta iyo xaqiijinta habsami u maaraynta ka ganacsiga xawaaladaha

## Qodobka 4aad
## Adeegyada Maaliyadeed ee Xawaaladdaha

Iyada oo ay reebban tahay in cidina bixiso adeeg xawaaladeed haddii aanay ruqsad ka haysan Baanka, xawaalad kasta:
1. Oo ruqsad lagu siiyay si waafaqsan Xeerkan, waxa u bannaan in ay lacag u dirto ama ka hesho dalka gudihiisa iyo dibadiisa.
2. Waxa ay ku bixin kartaa ama ku qaban kartaa lacagaha ay bixinayso ama dirayso Shilinka Somaliland iyadoo loo raacayo Siyaasada isku bedalka lacagaha qalaad ee baanka.
3. Waxa ka reebban bixinta adeegyadan soo socda:
   b. ka ganacsiga macdanta;
   t. dayminta lacagaha;
   j. haynta lacag la soo diray muddo ka badan laba (2) bilood
4. Waxa laamaha ka reebban inay goobahooda ganacsi ku dhex fuliyaan adeeg ka baxsan ka Baanku ruqsada u siiyay.

**CUTUBKA 2AAD**

## Qodobka 5aad
## Asaasidda Xawaaladdaha

1. Xawaalad kasta oo la aasaasayo waa in jiritaankeeda sharciyeed laga diiwaangeliyo Baanka.
2. Qaababkan kala duwan ayaa loo asaasi karaa xawaalad: -
   B. Xawaalad shuraako loo leeyahay
   T. Xawaalad keli loo leeyahay

## Qodobka 6aad
## Shuruudaha Ruqsadda

Cid kasta oo doonaysa in ay hesho ruqsad xawaaladeed waxaa ku waajib ah in ay gudbiso Baanka ama ku bixiso:
1. Warqada Codsiga ruqsadda oo baanku wareegto ku soo saarayo.
2. Heshiiska asaaska Xawaaladda (Articles of Association)
3. Xeerka Xawaaladda (Memorandum of Association)
4. Dammaanadda lacageed oo ku xusan qodobka 8aad faqraddiisa (1) ee Xeerkan.
5. Magacyada iyo Raadraaca taariikh nololeedka Madaxda sarsare ee xawaaladda.
6. Xaashida dembi la'aanta ee Madaxda Sare ee Xawaaladda.
7. Iyada oo marwalba loo eegayo Heerka sarifka Shilinka Somaliland:
   B. Khidmada codsiga furida Xawaalad Wadani ah wuxu noqonayaa 8,000,000/-

(siddeed milyan SLSH) oo aan la celinayn (non-Refundable).
T. Khidmada codsiga Xawaalad ajnebi ahi wuxuu noqonayaa 15,000,000/- (Shan iyo Toban milyan SLSH) oo aan la celinayn (non-Refundable).

8. Caddayn qoraal ah oo ay ka keento Baanka ganacsi oo uu aqoonsan yahay Baanku, taas oo muujinaysa raasamaalka gundhiga ah oo qaddarkiisu dhan yahay:
   B. Xawaalad Wadani ah= 2,000,000,000 Sl sh (laba bilyan) oo Somaliland Shillin ah.
   T. Xawaalad Shisheeye ah=5,000,000,000 Slsh (Shan bilyan) oo Somaliland Shillin ah.
9. Qorshe ganacsiyeedka (Business Plan) xawaaladda oo si faahfaahsan u muujinaysa nooca ganacsiga, qaab- dhismeedka, maamulka xawaaladda, iyo odoros maaliyadeedka saddexda sanno ee u horeeya.
10. Caddeynta lahaanshaha xarun ganacsi ee rasmi ah
11. Laamaha ay ka furi doonaan dalka.

## Qodobka 7aad
## Ruqsad-Siinta Laamaha Xawaaladaha Shisheeye

1. Haddii xawaalad shisheeye ay doonayso in ay laan ka furato dalka, waxay kala mid noqonaysaa shuruudaha ruqsad-siinta xawaaladaha waddaniga ah hadaan xeerku si kale jideyn.
2. Waa in xarunta guud ee xawaaladdu qoraal rasmi ah soo raaciso codsiga kaas oo ay ku dammaanad qaadayso masuuliyadda laanta.
3. Waxa uu Baanku codsan karaa caddaymo iyo xogo dheeraad ah haddii uu u baahdo.
4. Haddi ay madaxda xawaaldda ku jiraan dad ajnebi ahi waa in ay keenaan degnaanshaha dalka (Residence Permit).

## Qodobka 8aad
## Dammaanadda Ruqsadda

1. Shirkad kasta oo ruqsad loo siiyey in ay bixiso adeeg xawaaladeed waxa ay Baanka dhigaysaa dammaanad lacageed oo qaddarkeedu dhanyahay:
   b. Xawaalad wadani ah 1,000,000,000 SLSH (hal bilyan oo Somaliland shilling ah).
   t. xawaalad shisheeye ah 3,000,000,000 SLSH (Saddex bilyan oo Somaliland shilling ah).
2. Haddii xawaaladdu:
   b. Soo celiso ruqsadii ay haysatay;
   t. Ku guul-darraysato in ay cusbooneysiiso ruqsad dhacday
   j. Ruqsadda lagala noqday,
   Waxa Baanku dammaanadda ku xusan faqradda (1) ee qodobkan ka bixin doonaa qaddarka lacageed ee macaamiishu ku leedahay, haddii ay jirto.
3. Haddii xawaaladdu soo celiso ruqsadda ama ruqsadda lagala noqdo, Baankuna ku qanco in aanay jirin lacag ay macaamiishiisu ku leeyihiin, waxa loo sii daynayaa dammaanadda.
4. Dammaanad looga hayo xawaalad si waafaqsan Xeerkan, una adeegsan karto dan kale, lama bixi karto, uma bixin karto dayn lagu yeeshay nooca ay doonto ha noqotee.
5. Haddii la caddeeyo in saamiile xawaaladeed kacday ama maxkamadi amartay in lala wareego hantidiisa gaarka ah ee ka baxsan ujeeddada dammaanadda loo hayo,

qaddarka dammaanadda waxa loo aqoonsanayaa in aanay ka mid ahayn hantidiisa.

## Qodobka 9aad
## Cusbooneysiinta Ruqsadda

Xawaalad kastaa waa in ay soo codsato cusbooneysiinta ruqsad dhacday hal (1) bil ka hor taariikhda ay ruqsaddu dhacayso, iyada oo ku shubaysa Baanka Khidmada cusbooneysiinta:

B. Xawaalad wadani ah= 2,000,000 SHSL (laba milyan oo SLSH)
T. Xawaalad Shisheeye ah= 7,000,000 SLSH (Todoba milyan SHSL)

## Qodobka 10aad
## Hakinta Iyo La Noqoshada Ruqsadda

1. Baanku waxa uu hakin karaa ruqsad xawaaladeed muddo aan ka badnayn sagaashan (90) maalmood haddii xawaaladdu ku guul-darraysato in ay u hoggaansanto qodabbada Xeerkan.
2. Haddi xawaaladu u hogaansanto Mudada ku xusan farqada kowaad ee qodobkan, waxa u baanku qaadi doona hakinta.
3. Haddii xawaaladdu sii waddo jabinta Xeerkan, waxa Baanku si kama danbays ah ugala noqon doonaa ruqsadda, iyadoo laga mamnuucayo in ay ruqsad soo codsato muddo (6) bilood ah.
4. Waxa Baanku la noqonayaa ruqsad xawaaladeed haddii:
   b. Xawaaladdu ku guul-darraysato in ay u hogaansanto ama dhawrto tilmaamo qoraal ah oo Baanku u farayo si waafaqsan Xeerkan;
   t. Ay caddaato in xawaaladdu soo gudbiyey caddayn been ah ama marin habowsan markii ay dalbanaysey ruqsadda;
   j. Ay caddaato in xawaaladdu ku hawlan tahay falal ka dhan ah danta guud ama danta macaamiishiisa
   x. Rasamaalka xawaaladdu hoos uga dhaco qaddarka ku xusan Qodobka 6aad faqradiisa (8)
   Kh. Ay jabiso heshiiska Baanka Somaliland wada galeen.

## Qodobka 11aad
## Soo Celinta Ruqsadda

1. Baanku waxa uu aqbalayaa codsi soo celin ama hakin ruqsadeed ka dib marka ay u caddaato in aqbalaadaasi aanay khatar ku keenayn deganaanshaha suuqyada maaliyadeed ee dalka.
2. Haddii xawaalad soo celiso ruqsad ay hore u haysatay, waxa uu Baanku magacaabayaa hanti-dhawre madax bannaan oo 45 maalmood gudahood ku soo caddeeya in:
   b. Dhamaan lacagihii ay diraysey ay heleen loo dirayaashii
   t. Haddii ay jiraan lacago aan gaadhin loo dirayaashii dib loogu soo celiyey dirayaashii.
3. Haddii hanti-dhawruhu soo caddeeyo in aanay jirin dayn ay ku leeyihiin cidda ku xusan xarfaha (b) iyo (t) ee faqradda (2) ee qodobkan, waxa Baanku xawaaladda siinayaa warqad caddaynaysa in ay si Xeerkan waafaqsan u xidhay ganacsigeedii.

**Qodobka 12aad**
**Muddada Ruqsadda**

1. Ruqsadaha xawaaladeed ee Baanku bixiyaa waxaa ay ku muddaysan yihiin hal (1) sanno.
2. Cid kasta oo ruqsad loo siiyay si waafaqsan Xeerkan waa inay ku bilowdo adeegga ruqsadda loo siiyey muddo sannad gudaheed ah.
3. Xawaalad kasta oo ku guul-darraysata in ay ku bilowdo hawlaheeda muddada ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, waxa ay dib u soo codsanaysaa ruqsad cusub iyada oo soo buuxinaysa dhammaan shuruudaha ruqsad siinta.
4. Xawaalad kasta oo ku guul dareysata waa in codsiga ku cadeysaa sababta ay ku guul dareysatey ee ruqsada loogala noqdey

**Qodobka 13aad**
**Isku–Biiridda Xawaaladaha**

1. Labo (2) xawaaladood ama in ka badan waxa u bannaan inay isku biiri karan.
2. Isku biirida xawaaladaha waxa ansixinaya Baanka.
3. Xawaaladaha isku biiraya waa inay soo buuxiyaan shuruudaha xawaalad cusub iyadoo la raacayo qodobka 6aad ee xeerkan.
4. Ogolaanshaha ku xusan faqrada (1) ee qodobka waxa Baanka bixintiisa u eegi doona saamaynta uu ku yeelanayo adeegyada iyo xasiloonida suuqyada maaliyadeed ee dalka.

**Qodobka 14aad**
**Dhammaadka Xawaaladda**

1. Xawaalad u haysta ruqsad si waafaqsan xeerka waxa lagu xidhaya:
   b. Amar maxkamadeed oo kama danbays ah. t. Raali ahaanshaha saamileyda
   j. Haddii xawaaladu kacdo (musalafto)
2. Codsiga xidhid xawaaladeed ee ka soo bilaabma xawaalad ruqsad uhaysatay si waafaqsan xeerkan, waxa uu ku ansaxayaa ka dib marka uu Baanku siiyo caddaynta ku xusan qodobka 13aad faqradiisa 4aad ee xeerka.
3. Asbaabaha gebogebaynta ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa Korjooge ka noqon doonta Maxkamadda Gobolka.
4. Tallaabooyinka dheeraadka ah ee loo baahdo muddada ay socoto dhammaadka Wax loo raacayaa Xeerka shirkadaha (xeer Lr 80/2017).

**CUTUBKA 3AAD**
**MAARAYNTA XAWAALADAHA**

**Qodobka 15aad**
**Maamulka Xawaaladaha**

1. Xawaalad kasta waxa waajib ku ah in ay yeelato ugu yaraan hal Agaasime fulineed.
2. Xawaalad kasta waa in ay shaqaalaysiiso saraakiil aqoon, xirfad, hufnaan iyo waay-aragnimo ku filan u leh adeega xawaaladaha.
3. Shuruudaha Agaasimaha Fulinta (CEO)waa: - b. In uu yahay muwaadin reer

somaaliland ah.

t. In uu yahay qof lagu yaqaan shaqsi wanaag iyo akhlaaq.
j. In uu haysto Shahaado Jamacadeed.
x. In uu aqoon u leeyahay Maaliyadda, Baananka iyo xisaabaadka.
kh. In uu khibrad 5 sano ah leeyahay.
d. In aanu ahayn Shaqaale dawladeed.

4. Magacyada iyo raad-raaca nololeed (C.V) ee saraakiisha sarsare waxa loo soo gudbinayaa Baanka.
5. Agaasimaha fulinta ama saraakiisha sarsare waxa ka reeban inay ka hawl galaan xawaalad kale.
6. Xawaalad kasta waa in ay yeelato sarkaal u qaabilsan ka hortaga maydhista lacagaha.

## Qodobka 16aad
## Hanti Dhawr-ka Xawaaladdaha

1. Xawaalad kasta waa in ay sannad kasta magacawdo hanti-dhawre madax bannaan oo uu ansixinayo Baanku.
2. Waa in xawaaladdu saddexda bilood ee ugu horreeya sannadka ugu soo gudbiso Baanka nuqul ka mid ah warbixin xisaabeedka maaliyadeed oo uu ku saxeexan yahay hanta-dhawre la aqoonsan yahay (Audited Financial Statement)
3. Haddii Baanku ku qanci waayo warbixinta hanti- dharwrka, waxa uu amar ku siinayaa in xawaaladdu magacawdo hanti-dhawre kale oo uu ansixinayo Baanku

## Qodobka17aad
## Kaydinta Xogta Dhaqdhaqaaqyada

1. Xawaalad kasta waa in ay ku kaydiso xogta dhadhaqaaqyada lacageed ee ay samayso buugaag xisaabeed uu wareegto ku soo saari doono Baanku muddadiiba hal mar.
2. Xawaalad kasta waa in ay soo bandhigto buuggaag xisaabeedka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan si loo baadho marka ay wargelin qoraal ah ka hesho Baanka.
3. Buuggag xisaabeedyada iyo xogaha dhadhaqaaqyada ee ay xawaaladi samayso waa in ay hayso ugu yaraan (5) sanno oo ka bilaabanta taariikhda dhaqdhaqaaqyada ugu horreeya ay samaysay.

## Qodobka 18aad
## Laamaha Iyo Wakiilada

1. Xawaalad kasta waxa ay gobollada iyo degmooyiinka dalka ku yeelan kartaa laamo ama wakiilo.
2. Xawaaladina ma furan karto laan mana yeelan karto wakiil haddii aanay ogaysiin qoraal ah soo gaadhsiin Baanka.
3. Waa in laamuhu la socodsiiyaan Baanka haddii ay ka guurayaan goob hore oo ganacsi.

## Qodobka 19aad
## Daryeelka Macaamiisha

1. Xawaalad kasta waxaa waajib ku ah in ay macaamiisheeda qoraal ahaan ku war geliso macluumaadka la xidhiidha adeegyada ay fidiso, sida khidmadda diridda, shuruucda lacag dirista, lacag qaadashada iyo saacadaha shaqada.
2. Xawaalad kastaa waa in ay yeelato xafiis ama magcawdo sarkaal u xil saran daryeelka macaamiisha oo masuul ka noqon doona qabashada iyo xallinta cabashooyinka macmiilka.
3. Xawaalad kasta waxa waajib ku ah ilaalinta xogta macaamiisha haddii aanu sharci jidayn bixinteedda.
4. Haddii ay xawaaladdu baal marto faqradda 3aad ee qodobkan, waxa macmiilku dacwad madani ah ka furan karaa maxkamadda heer gobol.

## CUTUBKA 4AAD
## AWOODAHA BAANKA

### Qodobka 20aad
### Awoodaha Baanka

Baanku waxa
1. Uu awood u leeyahay in uu kordhiyo shurruudo dheeraad ah ruqsadaha xawaaladeed ee u bixiyo si waafaqsan xeerkan iyo xeerka Baanka dhexe.
2. Uu bedeli karaa, qaadi karaa ama uu wax ku kordhin karaa shuruudo ugu uu hore ugu ladhay ruqsad xawaaladeed.
3. Uu awood u leeyahay ka hor inta aanu bixin ruqsad in uu hubiyo in qalabka iyo xarunta xawaaladdu ku haboonyihiin bixinta adeeg xawaaladeed.
4. Uu kaga jawaabayaa codsiyada ruqsadaha xawaaladeed ee loo soo gudbiyo muddo hal (1) bil gudaheed ah.
5. Uu mudada ku xusan faqradda (4) ee qodobkan gudaheeda ka dalban karaa codsadaha xog dheeraad ah hadba sidii loogu baahdo.
6. Uu u diidi karaa in ruqsada la siiyo qofkaan buuxin shuruudaha loo dhigay ruqsad bixinta isaga oo raacinaya asbaabta diiditaanka si waafaqsan Xeerkan.

### Qodobka 21aad
### Kormeerka Iyo Baadhidda Xawaaladaha

1. Baanku isaga oo fulinaya waajibaadka xeerkan iyo Baanka Dhexe dhigayaan, waxa uu kormeer ku samaynayaa habsami u socodka dhadhaqaaqyada xawaaladeed.
2. Marka uu kormeer samaynayo Baanku, waxa waajib ku ah xawaaladaha iyo saraakiishooda inay u soo bandhigaan buugaag xisaabeedka iyo dhammaan dhaqdhaqaaqyada lacageed ama xog kasta oo muhiim u ah gudashada waajibaadka kormeerka.
3. Saraakiisha kormeerka ee Baanku waa inay sitaan caddayn qoraal ah oo awood u siinaysa inay xawaalad kormeeraan.
4. Baanku waxa uu awood u leeyahay in uu galo goob ganacsi xawalaadeed haddii shaki macquul ahi ka galo inay xawaaladdu u fulinayso hawlaheeda ganacsi si baal marsan Xeerkan.
5. Baanku waxa uu baadhayaa buuggaag xisaabeedka iyo dhammaan dhukumentiyada kale si uu u hubiyo u hogaansanaanta Xeerkan.

## CUTUBKA 5AAD
## CIQAABAHA

### Qodobka 22aad
### Ganaaxyada

1. Iyada oo waxba loo dhimayn awoodaha Baanka ee ku xusan qodobka 20aad ee isla qabyo qoraalkan xawaalad kasta oo u hogaansami weyda waajibka ku xusan qodobka 20aad waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan boqolkiiba konton (50%) khidmada cusboonaysiinta
2. Jebinta qodobka 16aad faqradiisa (1) iyo (2) waxa ka dhalanaya ganaax lacageed oo dhan SL. Shilin 10,000,000(Toban milyan).
3. Jebinta qodobka 11aad waxaa ka dhalanaya:
   b. Ganaax lacageed oo dhan SL. Shilin 5,000,000(shan milyan) haddii uu jebiyo faqradda (2) (t)
   t. Ganaax lacageed oo dhan Sl Shilin 2,500,000(laba milyan iyo shan boqol oo kun) haddii uu jebiyo faqradda (3)
4. Dhammaan ganaaxyada lacageed ee ku xusan xeerkan gudihiisa waxaa lagu shubayaa Baanka.
5. Haddii muddo 14 cisho gudahood ah xawaaladu ku bixin waydo ganaaxa ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waxaa lagu ganaaxayaa boqolkiiba (30%) dheeraad ah oo ku dhacaya khidmadda cusboonaysiinta.
6. Xawaalad kasta oo ku guuldaraysata in ay u hogaansanto faqradda (5) ee qodobkan waxaa laga hakinayaa ruqsadda muddo 30 maalmood ah.
7. Shakhsiyadda dabiiciga ah waxaa lagu ciqaabayaa, haddii ay fulin waayaan waajibaadka ku cad qodobka 15aad faqradiisa (6) in laga eryo labada xafiis mid ka mid ah laguna ganaaxo Sl, Shilin15,000,000 (shan iyo toban milyan).

### Qodobka 23aad
### Ciqaabaha Shakhsiyaadka Iyo Shirkadaha

1. Xawaalad kasta oo jebisa qodobada 15aad (1),(2),(3) iyo qodobka 17aad ee xeerkan waxa laga hakin doonaa ruqsadda muddo shan iyo afartan (45)maalmood ah .
2. Xawaalad kasta oo jebisa Qodobka 4aad (3) waxaa lagala noqonayaa ruqsadda.

## CUTUBKA 6AAD
## QODOBO QUBANE AH

### Qodobka 24aad
### Hirgelinta Xeerkan

1. Dhammaan xawaaladaha shaqaynayey ka hor xeerkan waa inay ku hirgeliyaan waajibaadka iyo shuruudaha uu dhigaayo muddo lix (6) bilood gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda uu dhaqan galay.
2. Xawaalad kasta oo fulin wayda waajibaadka faqradda (1) ee qodobkan waxay gashay fal dembiyeed ka dhan ah Xeerkan waxaana lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan Sl Shilin12,000,000(laba iyo toban milyan)

## Qodobka 25aad
## Soo Saarista Wareegtooyin

1. Iyada oo uu gudanayo Baanku waajibaadka ka saaran fulinta xeerkan waxa uu soo saari doonaa wareegtooyin ka farcama xeerkan.
2. Wareegtooyinka uu Baanku soo saaro waxa ay ka koobnaan doonaan waajibaad iyo habab faahfaahsan oo fulinaya qodobada xeerkan

## Qodobka 26aad
## Fulinta Xeerkan

1. Baanku waxa uu awood buuxda u leeyahay fulinta iyo dhaqan gelinta qodobada xeerkan.
2. Xafiiska xeer-ilaalinta Guud ayaa awood u leh oogidda fal danbeyeedyada iyo jebinta Qodobada xeerkan.
3. Maxkamada awooda u leh dhegaysiga iyo ka gar naqa dacwadaha ay soo oogaan xeer ilaalinta sida ku xusan Faqradda 2aad ee qodobkan.

## Qodobka 27aad
## Xallinta Khilaafaadka Iyo Rafcaan ka Qaadashada Go'aan diidmo Ruqsadeed

1. Xawaalad kasta waa in ay ku caddaysaa Xeerka shirkadaha habka loo raacayo xallinta khilaafaadka.
2. Go'aanada Baanka ee diidmo ruqsadeed waxaa looga racfaan qaadan karaa Guddiga Xalinta Khilaafaadka Maaliyadeed ee Baanka Dhexe sida ku cad Cutubka 13aad ee xeerka Baanka Dhexe ee Soomaaliland Xeer Lr.54/2012 muddo ku siman 30 maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta go'aanku soo baxo.
3. Haddii Racfaanluhu buuxiyo shuruudihii looga baahnaa oo loo diido Rukhsadda, waxa go'aanka guddida xallinta Khilaafaadka looga racfaan qaadan karaa Maxkamadda sare ee Soomaaliland muddo ku siman 30 (sodon maalmood gudahood) oo ka bilaabanta maalinta Go'aanka kama dambaysta ah la soo saaray.

## Qodobka 28aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha wakiiladu ansixiyo Madaxweynuhuna saxeexo.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle**<br>**Xoghayaha Guud ee Golaha**<br>**Wakiilada JSL** | **Md. Baashe Maxamed Faarax**<br>**Guddoomiyaha Golaha**<br>**Wakiilada JSL** |
| ______________________________ | ___________________________ |